

Fasalada 12aad ee Dugsiga Magaalada Columbus iyo Qoysaska sharafta leh ee 2020!

Waxaan ku farax-sanahay in aan idinla wadaago in aan u-dabaaldegno guulaha waxbarasho ee fasalkeena 12aad ee xaflad qalin-jabin ee internetka (Virtual) ah. Waxay si adag ugu howl-galeen inay helaan shahaadadooda dugsiga sare, isla markaana Dugsiyada Magaalada Columbus waxay diyaar u yihiin inay sharafaan guulaha ay gaareen.

Qaadashada go'aankeena aan ku qabanayno xaflado qalin-jabinta internetka (Virtual) ah inta lagu jiro aafadaan aduunkoodhan saamaysay oo aan qabanayno wax kasta oo aan kari karno si aan mid kasta oo idinka iyo qoysaskaba ugu ilaalinno ka bed-qabka cudurka faafa ee COVID-19-ka. Sameynta qorshaha qalin-jabinta waqtigaan aan caadiga aheyn wuxuu had iyo jeer ahaa mid isku dheelitiran bed-qabka mid-kasta oo ininka ah iyo qoysaskiina iyo macalimiintiina iyo shaqaalaha, iyadoo aan rabno inaan si habboon ugu dabaal-degno qalin-jabintaada. Xafladan qalin-jabinta ayaa saas sameynaysa ee Fasalka 2020.

Xirfadda qalin-jabin-taada internetka ah waxay soo bandhigi doontaa caadooyin badan, oo ah nooc cusub oo keliya lehna qaab abuur. Waxay noqon doontaa mid xiiso leh, waxayna yeelan doontaa mid ruxanta. Waxaa naga go'an inaan ka dhigno waqtigan mid xusuus iyo xiiso uleh labadaba fasalada 12aad iyo qoysaskooda.

Waakan qorshaha:

Soo-qaado Koofida iyo Koodhka: Fasalada 12aad waxay ka soo qaadan doonaan koofiyadooda iyo koodhadhkooda dugsiyadooda kuna beekan jadwalka kala duwan ee uu soo saaray maamulaha dhisme walba. Tilmaamaha kala fogaan shaha bulshada ayaa si adag loo dhaqan geliyey. Fasalada 12aad waxaa looga baahnaan doonaa inay ku jiraan gawaaridooda inta lagu gudajiro waqtiga soo-qaadashada isla maarkaana kala fogaanshaha bulshada loogu talagalay. Qoysaska aan lahayn gaadiid waxaa loo qaadayaa goobta sugitaanka ee leh bed-qabka si ay usoo qaataan. Ardaydu sidoo kale waxay soo celin doonaan aaladda elektirooningga ah, qalabka ama lebbiska yunifoomka ee dugsiga.

Lacagta Fasalka 12aad: Golaha waxbarashadu wuxuu cafiyey \$70-kii doolar ee lacagta (khidmada) Fasalka 12aad ee ardayda fasalka 2020. Go'aanka ayaa looga golleeyahay si looga fogaado in la saaro culeysk dheeraad ah ee fasalada 12aad ee horeyba ugu adkeysanayey dhamaadka walaaca leh ee cudurka COVID-19. Qoysaska horey u bixiyay lacagta waxay heli doonaan macluumaad ku saabsan sida loo helo lacag celinta.

Soo gud-bintad Sawirka Ardayga Fasalka 12aad: Fasalada 12aad waxaa laga codsanayaan inay soo gudbiyaan sawir ay ku labisan yihiin koofiyadooda oo ay ku muujiyaan hibooyin ay ka muuqdaan xafladda caanka ah. Sawirrada Aqoonsiga ardayga ayaa loo adeegsan doonaa

haddii ardaygu soo gudbin waayo sawirka xafladda. Wuxaan kuu soo diri doonaa maclummaad dheeri ah oo ku saabsan howsha iyo waqtiga loo qabtay in lagu sawiro.

Qalin-jabinta Internetka: Xafladda qalin-jabinta Internetka (Virtual) waxay dhici doontaa inta lagu jiro usbuuca 22ka -ilaa 27ka-Juun. Xaflad kasta oo ah qalin-jabinta dugsi sare ee ah internetka (Virtual) ayaa toos loogu baahin doonaa bogga Facebook ee Dugsiyada Magaalada Columbus iyo kan YouTube-ka, oo laga sii dayn doono kanaalka Columbus ee Waxbarshada u-Gaarka ah, iyo sidoo kalena lagu soo bandhigi karo Idaacadaha bulshada (WCBE-ka) 90.5

Xafladaha: 19-keena dugsiyada sare waxay lahaan doonaan afayeen caan qaran ah, oo leh hadalo gaagaaban oo aniga iga yimid, maamulahaaga, iyo dugsi walba oo leh af-hayeenk (halyeyga) ama arday lahadlaya oo la doortay, oo ay weheliso akhrinta magacyada mid walba oo ka qalinijabiyey.

Haddii bilow inaad daawato qorshaha xafladahaaga! Marti-gelinta xafladaha waa fursad fiican oo aad usoo jiidata qoyskaaga iyo asxaabtaada si bed-qableh oo ah kala fogaanshaha bulshada si aad uga daawato xafladan muhiimka ah ee ka socota guriga.

La wadaag Hambalyada ugu Fiican: Wuxaan ku dhiirigelinaynaa qof walba inuu **la wadaago sawirradooda, erayada dhiirrigalinta, iyo farriimaha hambalyada ee warbaahinta bulshada adoo adeegsanaya astaamaka (hashtag-ga) "CCSGrad2020".**

Faahfaahin dheeraad ah ee qalin-jabinta khadka tooska ah ee internetka (Virtual): Dhammaan maclummaadkaaga qalin-jabinta oo ay ku jiraan koofiyadaha iyo koodhka sookaadashada, Dhameystirka Xafladaha iyo Qalin-jabinta Jiilaalka (Kuleylaha) waxaa wadaagi doona maamulahaaga waxaana laga heli karaa khadka tooska ah **internetka (Virtual) ee ccsoh.us/classof2020**.

Macallimiintaada, maamulayaashaada, qoysaskaaga, iyo bulshada Columbus way kugu faani doonaan iyo guulaha aad gaadhay. Wuxaan aaminsanahay in qof kasta oo ah fasalka 12aad, oo ku labbis an koofiyad iyo Koodhka, uu dhix mari doono howlahaas qalin-jabinta sida aad idinkuba sameyseen hadda tan iyo intey bilaabateay dhibaatadan caafimaad ee aan horay loo arag.

Li ogolow inaan ku dhaho marka ugu horaysa Fasalka 2020: Hambalyo!

Si daacad ah,



Dr. Talisa Dixon
Kormeeraha Guud / Maamulaha, Dugsiyada Magaalada Columbus

Superintendent/CEO, Columbus City Schools